

# BrisDoc

Patient care by people who care



Hagaha Ilaaliyaha  
Bukaanada BrisDoc



**This leaflet is available in your language.  
Please ask our receptionist.**

ਇਹ ਪਰਚਾ ਆਪਣੀ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿਚ ਉਪਲਬਧ ਹੈ। ਸਾਡੇ ਰਿਸੈਪਸ਼ਨਿਸਟ ਨੂੰ ਪੁੱਛੋ ਕਰੋ ਜੀ।

یہ کتابچہ آپ کی زبان میں دستیاب ہے۔ ہمارے استقبالیہ براہ کرم دریافت کریں۔

এই প্রচারপত্র আপনার ভাষায় পাওয়া যায়। আমাদের রিসেপশনিস্টে জিজ্ঞাসা করুন।

Ev belavok li zimanê xwe de derbasdar e; Ji kerema xwe ve lêkirin me bipirsin.

Buuggan yar waxaa loogu heli karo luqaddaada. Fadlan weydii naga soodhaweeyahaa.

هذه النشرة متوفّرة في لغتك. رجاء سألت موظف الاستقبال لدينا.

Acest prospect este disponibil în limba dumneavoastră. Vă rugăm să cereți receptioner noastre.

Bu broşür kendi dilinizde mevcuttur. Lütfen resepsiyonistimize sorun.

此宣传册以您的语言提供。请问我们的接待员。

# Hagaha Ilaaliyaha Bukaanada BrisDoc

Intii aan ku daryeeleyno, waxaan rabnaa inaad dareento taageerid, ammaan iyo wargalsanaan.

Gacan ku haynta asturnaanta iyo sharafta bukaanadeena ayaa laga marmaan ka ah daryeelkeena.

Haddii aad rabtid ilaaliye markaad takhtarka u tegto, fadlan weydii shaqaalaha rugta caafimaadka. Inkastoo uu fiican yahay in ilaaliye kula joogo markii la sameynaayo baaritaanka xubnaha taranka, MAR WALBA aad takhtar arkeyso waxaad codsan kartaa ilaaliye. Fadlan ogow, shaqaaleheena caafimaad waxay ayagaba codsan karaan in ilaaliye la joogo markii ay baaritaan sameynayaan, haddii ay u maleeyaan inay u baahan yihiin.

Haddii u takhtarka dareensan yahay in ilaaliye kor joog ka noqdo baaritaankaaga caafimaad, laakiin adiga diido ilaaliyahaas, takhtarka wuu diidi karaa inuu ku baaro. Waxaa lagaa codsan karaa inaad saxiixdo foom sheegaayo inaad diidey inuu ilaaliye kor joog ka noqdo baaritaanka.

Ilaaliyaha waa inuu mar walba joogo markii la baaraayo cunug – kani wuxuu ahaan karaa waalid ama xannaaneyaha cunugga, laakiin waxaa jiri karo xaalado oo kani uusan habbooneen.

Haddii aad rabtid inaad aragto Siyaasadda Ilaaliyaha, fadlan weydii soo dhaweeyaha rugta caafimaad.

## Waa maxay Ilaaliyaha?

Ilaaliyaha waa qof ku raaci karo iyo taageeri karo adiga iyo takhtarkaaga intii laga sameynaayo baaritaan caafimaad ama la hadleyso takhtar.

Waxay xittaa halkaas u joogaan inay markhaati sharchiyeed u noqdaan

takhtarka haddii bukaanka si fiican u fahmin takhtarka ama dacwad been ah ka sameeyo.



## **Yaa ilaaliye noqon karo?**

Ilaaliyaha wuxuu ahaan karaa xubin ka tirsan shaqaalaha rugta caafimaad ama qof ku soo raaco, tusaale ahaan ninkaaga, xaaskaaga, lammaanahaada, xannaaneyahaada, waalidkaada ama saaxiibkaada.

**Carruurta ma noqon karaan ilaaliye iyo waa inay qolka ka baxaan markii la sameynaayo baaritaanka xubnaha taranka. Kani kuma jiro ilmaha aad u yar.**

Markii ilaaliyaha u yahay ninka, xaaska, lammaanaha, qaraabo ama saaxiib, waxaa lagu weydiin doonaa ogolaanshadaada inuu qofkaas goob joog ka noqdo baaritaanka iyo ilaaliye ku noqdo.

Tixgelin gaar ah ayaa la siin doonaa kala duwanaanta dhaqameed ama diimeed ee bukaanada markii la sameynaayo baaritaanka xubnaha taranka. Waxaa xittaa suurtgal ah inuu dhib yahay ama uusan habbooneen in xubin qoys ee jinsi kale ah (ama ninka/xaaska) goob joog ka noqdo baaritaanka xubnaha taranka.

Haddii loo baahdo baaritaanka caafimaad ka hor ama ka dib, waxaa la qaban-qabbin karaa fursad kale oo si gaar ama sir ah bukaanka la hadlo takhtarka – asagoo la joogin ilaaliyaha.

## **Maxaad ka filan kartaa ilaaliyaha ka socdo BrisDoc?**

Ilaaliyaha waa inuu is-baro iyo kuu sheego magacooda (ama ku baro takhtarka). Takhtarka waa inuu magaca ilaaliyaha ku qoro qoraallada.

Waa inay joogaan aaga baaritaanka lagu sameynaayo, si ay u arkaan wuxuu takhtarka sameynaayo. Markii la sameynaayo baaritaanka xubnaha taranka, ilaaliyaha wuxuu istaagi doonaa madaxaada agtiisa, iyo haddii baaritaanka uu yahay mi in yar xanuun leh waxaad ka codsan kartaa inaad gacmahooda qabato si ay in yar qalbiga kuu dejyaan. Ayaga kuma taaban karaan haddii aadan adiga u fasixin.

Haddii ilaaliyaha uu markhaati ka noqdo dabeecaad aan habboonayn, waa waajibkooda inay u sheegaan maareeyahooda.

Xubinada shaqaalaha BrisDoc ee sameeyo hawlahaa ilaaliyaha, si habboon ayaa loo wada tababarey.

Xaalado dhif ah, waxaa suurtgal ah inuusan joogin ilaaliye aad isku jinsi tiihiin.  
Xaaladahaas, takhtarka ayaad kala